Somali

SINNAAN KU HELID FINLAND GUDEHEEDA

Macluumaad loogu talagalay dumarka iyo ragga waddanka u soo guurey

TYÖMINISTERIÖ

Horudhac

Meesha ay dumarka iyo raggu kaga jiraan bulshada, dhaqamada kala duduwani way ku kal gedisan yihiin. Sidoo kale dhinacyada kala duwan ee adduunka fikradaha qoyska laga haystaa way kala duduwan yihiin. Buuggan waxaa lagaga sheekaynayaa meesha ay dumarka iyo ragga kaga jiraan waddankan Finland, waxaana lagu muujinayaa, sida dadka Finnishka ahi ay u fahmaan sinnaanta.

Buuggan waxaa loogu talagalay dumarka iyo ragga Finland u soo guureya iyo qoysaskooda. Buuggan waxaa lagu soo ururiyey aqoon aasaasi ah oo ku saabsan nolosha qoyska, barbaarinta carruurta, waxbarashada iyo nolosha shaqada. Ujeeddada laga leeyahay buuggani waa, inuu dadka ka caawiyo sidii ay u fahmi lahaayeen nidaamka waxqabadka ee dadka Finnishka.

Waddankan Finland dadka oo dhan waxay xaq u leeyihiin, in si caddaalad ah oo isku mid ah loola dhaqmo. Qofna lama ogola in lagu cunsuriyadeeyo nooca uu yahay (lab ama dheddig), meesha asalkiisu ka soo jeedo darteed ama diinta uu haysto awgeed. Cunsuriyadda waxaa lagu mabnuucayaa Finland sharciyada iyo heshiisyo badan oo caalami ah oo qabta Finland. Xuquuq, waajibaad iyo helitaanka fursad isku mid ah ayaa saameeya dumarka iyo raggaba. Dadka waddanka u soo guurey iyo dadka Finland u dhashayba waxay xaq u leeyihiin in si sinnaan leh loola dhaqmo.

Xafiisyada degmooyinka uu qofku deggan yahay ayaa laga heleyaa wixii faahfaahin ah ee ku saabsan waxyaabaha uu buuggani ka hadlayo. Haddii aqoonta luuqaddu aanay kugu filayn, markaad la xaajoonaysid shaqaalaha maamulka, iyaga ayaad weydiin kartaa inay suuragal tahay in turjubaan la isticimaalo. Marka laga hadlayo arrimo offishal ah, ma wanaagsana in xaaska/ninka ama ilmaha turjubaan ahaan loo isticimaalo. Haddii ay suuragal tahay waxaa wanaagsan in mar walba la isticimaalo qof xirfaddiisu tahay turjubaan.

Weydii shaqaalaha maamulka inay suuragal tahay in la isticimaalo tujubaan ama adeeg turjubaan oo lacag la´aan ah

Meel la talin gaar ah oo dadka waddanka u soo guurey loogu talagalay

Waxaa jira degmooyin badan oo leh goobo la talinta ah oo dadka waddanka u soo guurey loogu talagalay iyo shaqaale ku takhasusay u adeega dadka waddanka u soo guurey, kuwaas oo kaa caawinaya dhibaatooyinka nolol-maalmeedka ama kuu sheegaya meeshaad caawimo ka heli lahayd.

Tasa-arvoisena Suomessa – tietoa maahanmuuttajanaiselle ja -miehelle

Buuggan iyo turjumaadiisaba waxaa laga heleyaa cinwaanka: ***www.mol.fi/migration***

Qoridda: Virve Raittinen

Sawirada: Hanna-Kaisa Hämäläinen

Guddiga shaqada: Reet Nurmi/STAKES, Elina Sana/TANE, Batulo Essak/ETNO, Pirjo Takalo/Vähemmistövaltuutetun toimisto, Tarja Rantala/Työministeriö, Mai Salmenkangas/Työministeriö

Qorshaha garaafka ah iyo daabacaadda: Edita Prima Oy

Maalgeliye: Wasaaradda shaqada (Työministeriö), Vähemmistövaltuutetun toimisto, Tasa-arvoasiain neuvottelukunta

Helsinki 2002 *TME7.907 so*

Nolosha qoyska

Finland qoysasku waa yaryar yihiin, sababtoo ah inta badan waalidka iyo carruurtooda qaraabo kale lama noola. Qoysku wuxuu ka koobnaan karaa tusaale ahaan labada qof ee guriga ku wada nool ee is qaba ama wada nool, ninka iyo naagtiisa iyo carruurtooda ama labada waalid midkood iyo carruurta. Waxaa jira qoysas badan oo ka kooban labada qof ee is qaba iyo carruurta ay isu dhaleen iyo carruurta labadooda midkood ay isu dhaleen qof ay hore isu qabeen ama carruurta labadooduba dadkay hore isu qabeen isu dhaleen.

Labada qof ee guriga ku wada nool waxaa loola jeedaa labada qof ee is qaba ama wada nool. Sidoo kale laba qof oo lab ah ama dhedig ahi xiriirkooda way diiwaan geli karaan Finland. Waalidiintu Finland go'aan kama gaaraa qofka ilmahoodu guursanayo. Dumarka iyo ragguba si madax bannaanni leh ayey u dooran karaan qofka ay nolosha la qaybsanayaan.

GUURKA

Finland waxaa laysku guursadaa meher kaniisada ka dhaca ama meher shicib ah oo tusaale ahaan xafiiska diiwaangelinta ka dhaca (maistraatti). Meherka ka hor ayaa waxaa la baaraa inay jiraan waxyaabo guurka hor istaagi kara. Sida uu sharciga Finland qabo, qofku ma guursan karo, haddii ay weli qof kale is qabaan. Sidoo kale, haddii uu qofku 18 ka yar yahay iyo qaraabada aad isugu dhowba waxaa loo arkaa inay guurka hor istaagayaan. Waxyaabaha guurka hor istaagaya waxaa la baaraa iyadoo la raacayo sida uu sharciga Finland qabo, haddii labada qof ee is guursanay ugu yaraan midkood haysto dhalasho Finnish ah ama uu Finland deggen yahay.

*Finland intaan lays guursan ka hor, dadka is guursanayaa waa inay dalbadaan in la baaro in aanay jirin wax guurka hor istaagaya. Baaritaanka waxaa samayn kara **maistraatti-ga** ama **kaniisadda** ay labada qof ee is guursanayaa ama midkood ka tirsan yahay.*

Magaca qoyska

Meherka ka hor ayey labada qof ee is guursanayaa go'aan ka gaarayaan magaca qoyskoodu waxa uu noqon doono. Sida uu sharciga Finland qabo mid waliba magaca qoyskiisii hore ayuu haysanayaa ama midkood baa qaadanaya magaca qoyska ee ka kale, magacaas ayaana noqon doono magaca qoyska ee ka dhexeeya.

Xuquuqda iyo waajibaadka guurka

Sida uu sharciga Finland qabo labada qof ee is qaba xuquuqda iy waajibaadka saameeyaa waa isku mid. Hawlaha la xiriira daryeelka qoyska, sida shaqaynta iyo qabashada hawsha guriga si sinnaan leh ayey caadi ahaan u qaybsadaan.

Magaca qoyska ee la dooranayaa wuxuu saamayn ku yeelanayaa magaca qoyska ee carruurta

Mida 1aad ee suuragalka ah	*Labada qof ee isqaba magaca qoyska ee ka dhexeeya ee ay qaadanayaan wuxuu noqonayaa magaca qoyska ee naagta ama magaca qoyska ee ninka. Labada qof ka magaca qoyskiisu isbeddeley wuxuu isticimaali karaa magaca qoyskiisii hore iyo kan cusub oo laysku daba qabtay.*	*Markay sidan tahay carruurtu waxay qaadanayaa magaca qoyska ee waalidkood.*
Mida 2aad ee suuragalka ah	*Labada qof ee isqabaa mid waliba magacii qoyskiisa ayuu haysanayaa*	*Markay sidan tahay waalidka ayaa dooranaya magaca qoyska ee carruurtu qaadanayso midka uu noqonayo, ama magaca qoyska ee aabbaha ama kan hooyada. Magaca qoyska ee carruurta walaalaha ah oo dhan waa inuu isku mid ahaadaa.*

Sannadkii 2000 in ku dhow 2800 oo Finnish ah ayaa waxay guursadeen dad ah dadka waddanka u soo guurey. Ragga intooda badani waxay guursadeen Ruush, Istooniyaan iyo Taylandiis. Dumarkuna intooda badani waxay guursadeen Amerikaan, Biritish iyo Iswiidhish.

Masruufka qoyska labada qof ee is qabaaba shaqayn ayey kaga qaybqaadan karaan. Haddii labada qof ee is qaba midkood aanu shaqaynin, daryeelka qoyska wuu ka qaybqaadanayaa isagoo qabanaya hawsha guriga. Kan shaqeeya amaba lacagta badani soo gasho waa inuu qofka ay is qabaan siiyaa lacag guriga ka dhexeeya wax loogu soo gado iyo mid waxyaabaha caadiga ah ee u gaarka ah uu qofku ku qabsado.

Haddii labada qof kan lacagta badan shaqaystaa uu sidaa ogolaan waayo, haddii loo baahdo waxaa lagu khasbi karaa inuu kan kale siiyo lacagta caawimada masruufka (elatusapu). Sharciga Finland ayaa lagu caddaynayaa xaq u yeelashada lacagta caawimada masruufka oo ah lacag caawimo ah, caddadka ay noqonayso ama waa laga heshiiyaa ama go'aan ay maxakamaddu gaarto.

Sida guurku u saameeyo hantida

Labada qof ee is qabaa mid waliba isagaa hantidiisa siduu doono ka yeelaya. Sida uu sharciga Finland qabo labada qof ee is qabaa mid waliba isagaa iska leh hantida uu lahaa guurka ka hor ama tan uu helay muddada uu xaaska ahaaba. Laakiin midkoodna ma iibin karo ama cid kale ma siin karo iyadoon kan kale raalli ka ahayn, tusaale ahaan guriga ay ugu talagaleen inay ku wda noolaadaan, qalabka guriga ama alaabta carruurta.

Haddii laba qof ee is qaba midkood keligii deyn qaato, isaga ayey tahay inuu bixiyo. Deynka ay wada qaataan iyo deynka nolosha qoyska darteed labadooda midkood u qaato labadooduba si wada jir ah ayey u wada bixinayaan.

Arrinta ku saabsan hantida labada qof ee is qaba waxaa la raacayaa sharciga waddanka sharci ahaan deeggaan u noqda, markay is guursadaan. Haddii wakhti ka dib waddan kale deeggaan u noqdo, waddankaas sharcigiisa ayaa la raacayaa. Laakiin waddankan cusub sharcigiisa waxaa caadi ahaan la raacaa, ka dib markay labada qof ee is qabaa deggenaadaan ugu yaraan shan sannadood.

Haddii labada qof markay isguursadaan si joogto ah u deggaan Finland, sida guurku u saamaynayo hantida waxay noqonaysaa sida uu sharciga Finland qabo. Haddiise labada qof markay isguursadeen ay deggenaayeen meel kale, oo ay ka dib u soo guureen Finland, sharciga Finland waxaa la raacayaa ka dib markay labada qof halkan deggenaadaan shan sannadood. Inta ka horaysana waxaa la raacayaa sharciga meeshii hore ee deegaanka u ahayd. Haddiise ay dadku yihiin dad waddanka ka maqnaa oo ku soo noqday, sharciga Finland ayaa la raacayaa isla markay si joogto ah waddanka ugu soo noqdaan u deggaan.

Labada qof ee isqabaa waxay heshiis qoraal ah ku go'aansan karaan, in sida guurku u saamaynayo hantida la raaco tusaale ahaan waddanka ay dhalashadiisa yihiin sharcigiisa ama sharciga waddanka ay hore u deggenaayeen. Labada qof ee isqaba ee Finland u soo guurey waxay ku heshiin karaan, tusaale ahaan in arrinta ku saabsan sida guurku u saamaynayo hantida la raaco sharciga Finland, xitaa inta aanay shan sannadood halkan deggeneyn ka hor. Marka heshiiska la samaynayana waxaa inta badan wanaagsan in la weydiisto inay ku caawiyaan **xafiiska guud ee caawimada sharciga** (oikeusaputoimisto), **qareen** ama qof kale **oo sharci yaqaan ah**.

Sharciga dhaxalka

Dumarka iyo Ragguba Finland isku si ayey hantida u dhaxlaan. Carruurta iyo waxay iyagu sii dhaleenba waxay xaq u leeyihiin inay dhaxlaan hantida waalidkood, markay waalidku dhintaan. Haddii labada qof ee isqaba midkood dhinto isagoon wax carruur ah iyo waxay carruurtiisu sii dhaleen oo nooli aanay jirin hantidiisa oo dhan waxaa dhaxlaya qofka ay isqabeen ee nool.

Laakiin xeerkani ma shaqaynayo, haddii qofka dhintay uu ka tegey qoraal (testamentti) uu hantidiisa cid kale ku siinayo. Dadku iyagoo sameeya qoraal ku saabsan sida loo dhaxlayo ayey saamayn ku yeeshaan sida loo qaybinayo hantidooda, markay dhintaan ka dib.

Guud ahaan qofka waddanka u soo guurey xagga helitaanka dhaxalka wuxuu leeyahay xuquuq la mid ah mida kan qofka Finnishka ah. Arrinta dhaxalka waxaa ugu horayu la raacaa sharciga waddanka uu qofka la dhaxlayaa deggenaansho ahaan ka tirsanaa markuu dhintay. Sharciga la raacayo arrinta dhaxalka waxaa sidoo kale lagu caddayn karaa qoraalka uu qofka la dhaxlayaa ka tegeyo (testamentti).

*Arrimaha la xiriira qaybinta dhaxalka iyo diyaarinta qoraalka dhaxalka (testamentti) waxaa caawimo laga heli karaa tusaale ahaan **xafiisyada guud ee caawimada sharciga** iyo **qareemada** kaleba.*

Wada noolaanshaha iyo sharciga deggenaanshaha (avoliitto ja oleskelulupa)

Wada noolaanshuhu wuxuu sabab u noqon karaa helitaanka sharciga deggenaanshaha, haddii qofka Finland deggan iyo qofka ay wada nool yihiin ay wada deggenaayeen ugu yaraan laba sannadood ama ay ilmo isu dhaleen. Hase ahaatee sharciga deggenaanshaha lama siiyo, haddii labada qof midkood ay qof kale isqabaan.

Markuu ilmuhu dhasho ka dib Finland aabbayaashu 1-3 toddobaad oo fasaxa aabbaha ah ayey qaadan karaan si ay ilmaha u hayaan. Qiyaastii 60% aabbayaasha ka mid ahi waxay qaataan fasaxa aabbaha ee ay xaqa u leeyihiin.

WADA NOOLANSHAHA (AVOLIITTO)

Wada noolaanshaha waxaa loola jeedaa xiriir ay labada qof wada nool yihiin, laakiin aanay isqabin. Wada noolaanshuhu waa habka nooca ugu badan ee nolosha qoyska ee Finland. Xaaladaha intooda badan wada noolaanshuhu wuxuu la siman yahay guurka, tusaale ahaan badanaa go,aamada saameeya arrimaha badbaadada bulshada. Sida uu sharciga Finland qabo wada noolaanshuhu wuxuu kaga duwan yahay guurka, tusaale ahaan waxyaabahan soo socda:

- Carruurta labada qof ee wada nooli si toos ah uma helaan xuquuqda ay helaan carruurta labada qof ee isqabaa, waxaayse xuquuqdooda ku helaan iyadoo aabbanimada la xaqiijinayo. (fiiri bogga 7aad)
- Haddii labada qof ee wada nool kala guuraan, mid waliba hantidiisa isagaa haysanaya, haddii aan arrintan si kale looga heshiin.
- Labada qof ee wada nooli isma dhaxlaan, haddii aanay qoraal dhaxalka ah samayn. Wada noolaanshaha waxaa muhiim ah in lagu heshiiyo, sidii hantida ka dhaxaysa loo qaybsan lahaa, haddii la kala tago ama haddii midkood dhinto ka dib. Heshiisyada hanti da ku saabsan waa in qoraal ahaan loo sameeyaa.

Gudniinka gabdhaha lama ogola

Sida uu sharciga Finland qabo gumaadidda unugyada taranka ee gabdhaha iyo haweenku waa dembi laysku ciqaabo, ciqaabtiisuna waxay noqon kartaa sannado badan oo xabsi ah. Gudidda wiilashu Finland mabnuuc ma aha. Waase in la xasuusnaadaa, in ay tahay arrin aan wanaagsanayn, haddii wiilka isaga oo aan raalli ka ahayn la gudo. Waa haddii wiilku uu yahay mid da'diisa awgeed awooda inuu bixiyo ogolaanshihiisa. Ilmaha da'da iskuulka gaadhey waxaa Finland loo arkaa inuu yahay da' ay tahay in waxa uu rabo tixgelin la siiyo. Maadaama wiilasha diin ahaan loo gudayaa aanu ahayn daryeel caafimaad ama jirro la daaweeynayo, degmooyinka qaarkood ma ku sameeyaan gudniinka noocaas ah meelaha caafimaadka ee degmadu leedahay. Waase in gudniinka lagu sameeyaa xaalad ay suuragal tahay in si ku filan loo sugo aqoonta cilmiga caafimaadka, nadaafadda iyo waxyaabaha xanuunka baabi'iya.

Carruurta

Hadafka siyaasadda qoyska ee Finnishka ayaa waxay tahay in ilmuhu helo deegaan nabadgelyo leh oo uu ku koro, waalidkuna ay helaan waxyaabaha ay u baahan yihiin xag alaab ahaan iyo xag nafsad ahaanba, si ay ugu suuroowdo inay ilmo dhalaan oo barbaariyaan. Wakhtigan hadda lagu jiro waxaa carrabka lagu adkeeyaa siday labada waalidba si

isle'eg u leeyihiin xuquuqda barbaarinta ilmaha. Marka masuuliyada la qaybsado waxaa sahlanaanaya in laysu dheellitiro nolosha shaqada iyo qoyska, waxayna isla markaa qaninimo siinaysaa nolosha ragga.

Sida uu sharciga Finland u degsan qabo waa in carruurta si sinnaan leh loola dhaqmaa. In caruurta la dilo ama si kale jir ahaan wax loogu geysto sharciga ayaa mabnuucaya. Xuquuqda carruurtu waa isku mid ha ahaadeen kuwo waddanka u soo guurey ama Finnishba. Gabdhaha iyo wiilashuba xuquuq isku mid ah ayey Finland leeyihiin.

Qorshaynta qoyska

Dhaliinka ilmuhu waa go'aan ay si wadajir ah u gaaraan ninka iyo naagtu, waxaana inta badan dadku rabaan inay ku beegaan wakhti xagga noloshooda labadoodaba ku haboon. Ragga iyo dumarkuba wixii caawimo ah ee ku saabsan qorshaha qoyska iyo ka hortagga uurka waxay iyagoo lacag la'aan ah ka helayaan **rugaha caafimaadka** iyo **xarumaha la talinta qoyska iyo ka hortagga uurka** (perhe- ja ehkäisyneuvolat). Waxyaabaha uurka lagaga hortago waxaa Finland laga iibsan karaa dukaamada cuntada iyo farmashiyayaasha.

Dumarka waxaa u wanaagsan inay si joogto ah ugu tagaan **dhakhtarka cudurada haweenka**, si loo fiiriyo. Isla markaana waxaa suuragal ah in dhakhtarka lagala hadlo siyaabaha kala duwan ee ka hortagga uurka. Adeegga gaynakolojiga ee rugaha caafimaadku way ka jaban yihiin adeega dhakhaatiirta barayfitka ah. Dumarka waxaa u suuragal ah inay codsadaan, in dhakhtarka qaabilayaa uu noqdo dhakhtar haween ah. Uurka waxaa lagu hubsan karaa baaritaanka uurka ee rugta caafimaadka lagu sameeyo ama iyadoo farmashiyaha laga soo gato qalabka uu qofku isagu ku ogaan karo inuu uur leeyahay iyo in kale.

Aborshan (abortti)

Joojinta uurku oo ah aborshanka wuxuu Finland suuragal yahay in la sameeyo, haddii dhaliinku uu qatar u keenayo caafimaadka haweeneyda ama haddii uurka iyo dhaliinku ay culays weyn ku yihiin nolosha haweeneyda. Haddii ay haweeneydu rabo aborshan waa lagu samaynayaa, haddii da'deedu ka yar tahay 17 sano ama ka weyn tahay 40 sano. Uurka waxaa la joojin karaa oo keliya, haddii haweeneydu dalbato. Aborshanka aan ahayn kan sabab caafimaad darteed loo samaynayo waa in la sameeyaa inta lagu jiro 12 toddobaad ee uurka ee ugu horeeya. Marka lagu fekereyo in aborshan la sameeyo waa in sida ugu dhakhsaha badan dhakhtar loola xiriiraa.

DHALASHADA ILMAHA

Waxaa muhiim ah in hooyooyinka uurka lihi tagaan **rugta la talinta hooyada** (äitiysneuvola) ama ay dhakhtar u tagaan, si loogu sameeyo baaritaanka caafimaadka ka hor inta aanay dhammaan bisha afraad ee uurku. Caawimada hooyada (äitiysavustus) waxaa xaq u yeelanaya oo keliya hooyooyinka tegey baaritaanka caafimaadka wakhtigii la rabey. Si loo helo lacagta hooyonimada waxaa sidoo kale loo bahan yahay warqad caddayn ah oo laga bixiyey rugta talabixinta ama uu dhakhtar bixiyey oo sheegeysa inta uu uurku yahay (fiiri bogga 8aad).

Tegitaanka joogtada ah ee rugta talasiinta hooyada ayaa lagula soconayaa xaaladda hooyada iyo tan ilmahaba ee wakhtiga uurka. Tegitaanka rugta talasiintu waa lacag la'aan. Aabbayaashu sidoo kale way ka qayqaadan karaan tegitaanka rugta talasiinta. Rugta talasiinta ayaa dadka loogu sheegaa macluumaadka la xiriira dhalashada ilmaha iyo tababaradaba iyo weliba korsooyinka labada waalidba loogu talagalay oo **rugaha caafimaadka** intooda badani qabanqaabiyaan.

Dumarku waxay Finland ku ummulaan isbitaalada dhaliinka (synnytyssairaalat). Aabbayaasha waa u suuragal inay markay hooyadu ummulayso la joogaan. Aabayaasha Finnishka intooda badanina way rabaanba inay taageeraan hooyada markay ummulayso oo ummushay ka qaybqaataan.

Aabbaha ilmaha

Ilmuhu wuxuu xaq u leeyahay inuu labadiisa waalidba ka helo daryeel iyo badbaadin oo xah xagga nafsada iyo mid alaabeedba. Si xuquuqda ilmaha loo sugo waa in la ogaadaa qofka ilmaha aabbihiis ah. Sida sharciga Finland qabo markay laba qof isqabaan, ninka ayaa ilmaha aabbihiis ah.

Haddii ilmuhu uu dhasho iyadoo aanay labada qof isqabin, aabbanimada waxaa

xaqiijiya **qofka u xilsaaran arrimaha carruurta ee degmada ay deggen yihiin** (asuinpaikkakunnan lastenvalvoja), haddii aanay hooyada ilmuhu diidin. Sidoo kale ilmaha u dhasha labada qof ee wada nool, aabbuhu waa xafiiska qofka arrimaha carruurta qaabilsan ku qirtaa aabbanimadiisa. Marka aabbanimada la xaqiijiyo ilmuhu wuxuu yeelanayaa xuquuq la mid ah tan ilmaha ay dhaleen labada qof ee isqaba.

Dhalashada ilmuhu yeelanayo

Ilmuhu markuu dhasho wuxuu dhalashada Finnishka heleyaa, haddii:

- hooyadu leedahay dhalasho Finnish ah, markuu ilmuhu dhasho
- ilmaha aabbihii leeyahay dhalasho Finnish ah, laakiin xaaskiisa ilmaha dhashay ay ajnebi tahay
- ilmaha aabbihii dhintay isagoo leh dhalasho Finnisha, ayna isqbeen ilmaha hooyadii
- ilmuhu Finland ku dhasho, markuu dhashana aanu helin dhalasho waddan kale.

BARBAARINTA IYO DARYEELKA ILMAHA

Waayoaragnimada ayaa caddaynaysa in lahaanshaha laba luuqadood iyo laba dhaqan ay yihiin hantida dheeraadka ah ee mustaqbalka carruurta dadka waddanka u soo guurtey. Waalidkuna xoog ayey arrintan saari karaan iyagoo si joogto ah carruurtooda ugula hadlaya afkooda hooyo, dhaqankoodana u baraya. Afka iyo dhaqanka Finnishka carruurtu waxay ku baranayaan xannaanada iyo iskuulka.

Daryeelka caafimaadka ee carruurta

Bulshada ayaa waalidka kala qaybqaadata daryeelka caafimaadka ee ilmaha. Laga bilaabo markuu ilmuhu dhasho ilaa uu toddoba sano ka gaarayo caafimaadkiisa iyo kan hooyadiis waxaa la socda **rugta la talinta caafimaadka carruurta**, oo si joogto ah loogu baaro caafimaadka ilmaha. Rugta talasiinta ayaa tallaalada uu ilmuhu u baahan yahay lagu tallaalaa, waxaana laga helaa macluumaadka la xiriira daryeelka iyo barbaarinta ilmaha iyo waalidnimada. Hooyooyinka aabbayaashuba rugta talasiinta ayey weydiin karaan waxyaabaha maskaxdooda ku wareegaya. Adeegga saykayteriga (psykiatria) iyo takhasuska hadal barashada (puheterapeutti) waxaa helaa iyadoo la weydiisanayo **rugta la talinta qoyska**. La socodka caafimaadka carruurta da'da iskuulka ah waxaa u xilsaaran **kalkaalisada caafimaadka ee iskuulka**, **dhakhtar** iyo **dhakhtarka ilkaha ee iskuulka** iyagoo si wadajir ah ula shaqaynaya waalidka.

Kaalmada dhaqaale ee qoyska ilmaha leh

Qoysaska carruurta leh noloshooda dhaqaale ahaan waa loo fududeeyaa Finland, iyadoo la siinayo kaalmooyin dhaqaale oo kala duduwan. Kaalmooyinkaas qaar ka mid ah waxaa xaq u leh qof walba oo Finland deggan, qaarkoodna waxaa xaq u leh oo keliya dadka muddo dheer si joogto ah Finland u deggenaa.

- **Caawimada hooyonimada** (äitiysavustus) waxaa la siiyaa hooyo walba oo Finland deggan, oo martay baaritaanka caafimaadka ee rugta talasiinta ama dhakhtar u tagtay ka hor inta aanay dhammaan bisha afraad ee uurka. Caawimada qofku wuxuu u qaadan karaa lacag ahaan ama iyadoo baakad alaab ah. Baakadda alaabta waxaa ku jira dharka uu ilmaha yar ee dhashay u baahan yahay iyo waxyaabaha loogu bahan yahay daryeelka ilmaha.
- **Lacag maalmeedka waalidka** (vanhempainpäiväraha) waxaa la siiyaa waalidka ilmaha guriga ku haya tobonka bilood ee ugu horeeya. Lacag maalmeedku waxay ka kooban tahay lacagta hooyonimada, tan aabbanimada iyo lacagta waalidka. Caawimadan waxaa xaq u leh dhammaan dadka Finland si joogto ah u deggenaa ugu yaraan 180 maalmood ka hor wakhtiga lagu qiyaasay inuu ilmuhu dhalanayo. Caddadka lacagtu caawimadu wuxuu ku xiran yahay dakhliga shaqada ka soo geli jirey. Waalidka aan shaqaynin waxaa la siiyaa lacag maalmeedka ugu yar.
- Kharashka qoysaska carruurta leh ka baxa waxaa lagu caawiyaa **lacagta carruurta** (lapsilisä), oo la siiyo ilmo walba oo 17 sano ka yar oo Finland si joogto ah u deggan.

*Wixii faahfaahin dheeraad ah ee ku saabsan caawimooyinka ay xaqa u leeyihiin qoysaska carruurta leh, waxaa laga heleyaa xafiisyada Hay'adda caymiska caafimaadka qaranka ee loo yaqaan **KELA,** xafiisyadaas ayaana caawimada laga dalbadaa. **Rugta la talinta hooyada** sidoo kale waa laga ogaan karaa wakhtiga ay tahay in caawimooyinka la dalbado.*

Iskuulka ayaa taageera dhaqanka dadka waddanka u soo guurey

Waxbarashada waxaa laysku dayaa in la tixgeliyo dhaqanka iyo jinsiyada dadka waddanka u soo guurey, waxaana lagu taageeraa in aanay lumin. Inta aanay fasalka caadiga ah u wareegin ardayda waddanka u soo guurtey waxaa suuragal u ah inay helaan waxbarasho diyaarin ah oo ay kooxdooda ku dhex qaadanayaan. Carruurta afafka kale ku hadlaa waxay heli karaan si dheeraad ah waxbarashada laaga caawiyo iyo in la siiyo xiisado ay afkooda hooyo ku qaadanayaan. Waxaa la samayn karaa in carruurta loo qabanqaabiyo waxbarasho afkooda hooyo ah. Caadi ahaan waxbarashada afka hooyo waxaa carruurta la siiyaatoddobaadkii laba saacadood.

Waalidku waxay iskuulka kala hadli karaa sida waxbarashada diinta iyo cuntooyinka gaarka ah ee ay tahay in ardaydooda la siiyo. Iskuuladu waxay wadajir ula shaqeeyaan waalidka. Waalidiinta oo dhanna way wanaagsan tahay inay ka qaybqaataan kulamada waalidiinta ee iskuulada lagu qabto (vanhempainilta) iyo wadahadalada lala yeesho macallimiinta iyo kalkaalisada caafimaadka ee iskuulka iyo hawlaha ururka waalidiinta.

XANNAANO MAALMEEDKA

Finland waa wax caadi ah, in carruurta maalintii lagu xannaaneeyo meel aan guriga. Xannaano maalmeedka waxaa la rabaa, in lagu taageero dheellitirka iyo koriinka ilmaha oo dhinac walba ah. Isla markaana waxaa la rabaa, in labada waalidba lagu dhiirigeliyo, inay iyagoo u siman ka qaybqaataan nolosha shaqada iyo waxbarashada. Waalidku saddex siyood ayey u abaabuli karaan haynta ilmahooda:

- Hooyada ama aabbaha ayaa ilmaha **guriga** ku haynaya oo shaqada fasax mushahar la'aan ah oo ah haynta ilmaha ka qaadanaya. Waalidka ilmaha haya dhaqaale ahaan waa la caawiyaa oo waxaa la siiyaa lacagta haynta ilmaha (kotihoidon tuki), ilaa inta uu ilmuhu saddex sano ka gaarayo.
- Ilmaha waxaa hayn kara **qof barayfit ah oo carruurta haya** ama **xannaano barayfit ah** ayaa la geyn karaa. Waalidka waxaa la siinayaa lacagta caawimada haynta barayfitka ah (yksityisen hoidon tuki) oo ah qayb ka mid ah kharashka kaga baxa meesha ilmaha lagu hayo ee barayfitka ah.
- Degmada ay deggen yihiin ayaa ilmaha aan da'da iskuulka gaarin ka siinaysa meel lagu hayo **xannaanada** ama **qoys ilmaha gurigooda ku haya**. Kharashka haynta ilmuhu wuxuu ku xiran yahay dakhliga qoyska soo gala. Qoysaska dakhligoodu yar yahay haynta carruurtoodu waa lacag la'aan.

Wixii faahfaahin ah ee ku saabsan xannaano maalmeedka carruurta waxaa laga helayaa xafiiska arrimaha xannaanada ee degmooyinka. Noocyada lacagta haynta carruurta waxaa la weydiin karaa xafiiska Hay'adda caymiska qaranka oo ah KELA.

DHIGASHADA ISKUULKA

Dhammaan carruurta sida joogtada ah Finland u deggan waxaa saameeya waajibaadka guud ee waxbarashada. Arrintan macnaheedu waa carruurta waddanka u soo guurtey inay sameeyaan waxbarashada dugsiga hoose/dhexe oo 9 sannadood ah. Inta aanay iskuulka bilaabin ka hor carruurtu waxay ka qaybqaadan karaan waxbarashada u diyaarinta iskuulka ee lagu bixiyo xannaanada ama iskuulka. Dugsiga hoose/dhexe waxaa caadi ahaan la bilaabaa sannadka ilmaha 7 sano u buuxsamayso. Gabdhaha iyo wiilashuba fursad isku mid ah ayey u leeyihiin inay iskuul dhigtaan. Waxbarashada aasaasiga ah, qalabka wax laga baranayo, cuntada iskuulka iyo daryeelka caafimaadku waa lacag la'aan.

*Waxyaabaha la xiriira dhigashada iskuulka waxaa lagala hadli karaa **gudoonka waxbarashada** iyo shaqaalaha **iskuulka** ee degmada uu qofku deggen yahay.*

Wada shaqaynta xannaanada iyo waalidku waa muhiim

Hawlaha xannaanada waxaa ka mid ah inay taageeraan horumarka luuqadda iyo dhaqanka ilmaha waddanka u soo guurey, ayna xoojiyaan jinsiyadooda dhaqamada badan leh. Waa muhiim, inay waalidku shaqaalaha xannaanada kala hadlaan barbaarinta ilmaha ayna ku heshiiyaan waxyaabaha arrintan la xiriira oo faahfaahsan.

Waxbarashada

Waxbarashada Finland waa la qiimeeyaa. Inuu qofku waxbartana waa shayga ugu muhiimsan xagga shaqo helidda, sababtoo ah xirfadaha intooda badan qofka waxaa looga baahan yahay waxbarasho. Waxbarashadu waxay kaloo kordhisaa sinnaanta dumarka iyo ragga. dadka waxbartay fursad fiican ayey u leeyihiin inay bulshada wax ka qabsadaan oo ay naftooda daryeelaan.

Finland waxaa la rabaa, in dadka oo dhami helaan fursad ay u siman yihiin oo ay wax ku bartaan, horumarna ku gaaraan iyada oo aan loo eegeynin tusaale ahaan ma ragbaa mise dumar, meeshay asalkooda ka soo jeedaa iyo hantidoodatoona.

In sinnaantu hirgasho xagga waxbarashada waxaa xitaa ilaa xad lagu caaawiyaa lacagta kaalmada waxbarashada iyo ilmaha oo maalintii meel aan guriga ahayn lagu hayo. Waxyaabahani waxay sababeen, in dumarku aad wax u bartaan Finland. Dadka waddanka u soo guurey waxbarashada ayey ku heleyaan aqoonta iyo xirfadaha bulshadan Finnishka looga baahan yahay, waxayna isla markaana xejisan karaan afkooda hooyo iyo dhaqankooda.

Barashada afka

Qofka waddan dibedda ah Finland uga soo guurey waxaa muhiim u ah inuu barto afka Finnishka ama degmooyinka qaar afka Iswiidhishka. Machadyo badan ayaa waxay dadka waddanka u soo guurey u qabanqaabiyaan koorsooyin af Finnish iyo af Iswiidhish ah. Ka qaybqaadashada koorsooyinka luuqadda waa inay weheliyaan in luuqadda lagu hadlo oo la raadsado dad Finnish ah oo lagula hadlo, tusaale ahaan sida hiwaayadaha. Aqoonta afka iyo inay dadka isbartaani waxay qofka u sahlaan inuu la qabsado xaaladaha waddanka cusub.

Waxbarashada waddanka dibediisa lagu soo qaatay

Waxbarashada uu qofka waddanka u soo guurey hore u soo bartay iyo waayoaragnimada shaqaduba waxay sal u noqonayaan qorshaynta waxbarashada iyo inuu Finland ku sii buuxsado. Shahaadooyinka jaamacadda ee waddamada dibedda laga soo qaatay in la aqoonsado ama loo arko inay u dhigmaan shahaadooyinka jaamacadda ama jaamacaddaha hirfadda ee Finnishka waxaa laga dalban karaa **Guddiga waxbarashada** (Opetushallitus). Waxbarashooyinka kale ee dibeda lagu soo qaatay waxaa warbixinta u dhiganka (vastaavuuslausunto) ka dhiiba Gudigga waxbarashada. Adeegyadani waa lacag la'aan. Haddii ardaygu rabo inuu goobaha waxbarashada ee Finland ka buuxsado shahaadadiisii hore, goobtaas waxbarashada ayaa qiimaynaysa shahaadada, iyadoo sal u noqonaysa shahaadada cusub ee uu qaadan doono.

Noocyada kala duwan ee waxbarashada

Sagaalka sannadood ee dugsiga hoose/dhexe ka dib nooca waxbarashada ee Finland ugu caadisan waa **dugsiga sare** oo lagu qaato waxbarasho guud, ama **macadka xirfadda** (ammatillinen oppilaitos). Ka dibna waxbarashada waxaa laga sii wadan karaa **dugsiga tacliinta sare** (korkeakoulu), **dugsiga xirfadda ee tacliinta sare** (ammatillinen korkeakoulu) ama **jaamacadda** (yliopisto).

Dadka dibedda ka soo guurey ee Finland yimid waxay waxbarashada dugsiga hoose/dhexe iyo tan dugsiga sareba ku qaadan ka-

Waxbarasho cimrigaaga oo dhan ah

Finland waxaa laga hirgeliyaa nidaamka ah waxbarasho cimrigaaga oo dhan ah (elinikäinen oppiminen). Taasna waxaa loola jeedaa in uu qofku markuu weynaado xitaa waxyaabo cusub barto, aqoontiisana korodhsado. Waxbarashooyinka dheeraadka ah ayaa lagu suurogeliyaa in dadka shaqeeya xirfadooda iyo aqoontoodu la socoto nolosha shaqada ee casriga lagu jiro oo ah mid si dhakhso ah isu bedbedesha.

Dumarka iyo ragga Finnishkuba naftooda ayey wax u bartaan. Wakhtigan hadda lagu jiro dadka da'doodu 50 sano ka yar tahay dumarka ayaa ragga ka waxbarasho badan. Jaamacadaha iyo goobaha waxbarashada ee tacliinta sare ardayda dhigata in kala bar ka badan ayaa dumar ah.

raan **dugsiga sare ee dadka waaweyn** ama **macadka koorsooyinka bixiya** (kansanopisto). Waxaa sidoo kale Finland ku yaalla **macadada xirfadaha ee waxbarashada dadka waaweyn** (ammatillinen aikuiskoulutuskeskus) oo fara badan, kuwaas oo ay dadka waaweyni ku baran karaan xirfad ama ay ku kordhisan karaan waxbarashada shahaadaday hore u haysteen. Dadka waddanka u soo guurey inta aanay waxbarashada xirfadaha lagu baranayo bilaabin ka hor ayey waxay kordhisan karaan aqoontooda luuqadda iyo waxyaabaha kale ee looga baahan yahay si ay waxbarashada ula socon karaan, iyagoo goobaha wax lagu barto ku qaadanaya waxbarashooyin kala duwan oo dhammaystir iyo u diyaarin ah. Qofku wuxuu xirfad baran karaa isagoo **waxbarashada ku qaadanaya goob**

Qorshaha la qabsashada waddanku wuxuu caawinayaa in waddanka lala qabsado

Haddii qofka Finland u soo guurey aanu helin shaqo ama waxbarasho, xafiiska shaqada ama xafiiska sooshalka ayaa waxaa loogu samayn karaa qorshaha la qabsashada waddanka. Hadafka qorshuhuna waa in dadka waddanka u soo guurey laga caawiyo siday shaqo u heli lahaayeen, bulshada Finnishkana ula qabsan lahaayeen. Qofka waddanka u soo guurey ayaa qorshaha wuxuu si wadajir ah ula samaynayaa qof shaqaale ah oo xafiiska shaqada ka socda iyo sooshalka. Qorshahana waxaa tixgelin la siinayaa waxyaabaha uu qofku isagu rabo, xaalada noloshiisa iyo aqoonta xirfadda uu yaqaano. Qorshaha la qabsashada waddanka waxaa badanaa ka mid ah barashada afka Finnishka, kordhisashada aqoonta xirfadda iyo shaqo barasho. Mararka qaar qorshaha waxaa ku jira inuu qofku barto xirfad cusub. Qorshaha la qabsashada waddanku ugu badnaan waa saddex sano.

Inta lagu jiro wakhtigaas ayuu qofka waddanka u soo guurey fulinayaaqorshihiisa la qabsashada waddanka, dakhli kalena ma soo galo. Waxaase nolon ahaan loo siinayaa lacagta caawimada la qabsashada waddanka (kotoutumistuki). Inuu qofka waddanka u soo guurey helo lacagta caawimada waxaa shuruud u ah, inuu qofku dhawro qorshaha la qabsashada waddanka ee loo dejiyey.

shaqo (oppisopimus). Dadka shaqa la'aanta ah ee shaqa raadiska ah waxaa loo qabanqaabiyaa korsooyin muddada ay soconayaan kala duwan yihiin oo **xafiiska shaqadu bixiyo** (työvoimakoulutus), koorsooyinkaasna xafiiska shaqada ayey dadka waddanka u soo guurey ka dalban karaan.

Waxbarashada la qabsashada waddanka

Degmooyinka intooda badani waxay dadka waaweyn ee waddanka u soo guurey u qabanqaabiyaan waxbarashada la qabsashada waddanka oo qiyaastii lix bilood socota. Waxbarashada waxaa lagu bartaa afka Finnishka, aqoonta ku saabsan bulshada Finnishka ah, waxaa kaloo lagu qaataa hagid ama tilaamid ku saabsan waxbarashooyinka iyo nolosha shaqada, waxaana la soo arkaa oo la soo bartaa goobaha shaqada tusaale ahaan iyadoo la adeegsanayo shaqo barashada (työharjoittelu). Arday walbana waxaa loo sameeyaa qorshe waxbarasho ama shaqaaloobid ah oo isaga u gaar ah. Mudnaanta koobaad dadka la siiyaa waa dadka waddanka u soo guurey ee shaqa la'aanta ah ee shaqa raadiska ah. Sidoo kale degmooyinka qaar dadka aan akhriska iyo qoraalka aqoon waxaa loo qabanqaabiyaa waxbarsho gaar ah.

*Waxyaabaha ku saabsan noocyada kala duwan ee waxbarashada, qorshaha la qabshada waddanka iyo waxbarashada la qabsashada waddankaba waxaad ka heleysaa **xafiiska shaqada** ee degmada aad deggen tahay.*

Lacagta caawimada ee waxbarashada

Xaaladda dhaqaale ee ardayda waxaa Finland lagu sugaa lacagta caawimada ee waxbarashada. Qofka ajnebiga ah ee sida joogtada ah Finland u deggan ee hawshiisu tahay waxbarsho, waxaa lacagta caawimada ee waxbarashada la siinayaa, haddii uu Finland deggenaa ugu yaraan laba sanadood isaga oo aan ardaynimo ku joogin. Dadka qaxootiga ah iyo xubnaha qoyskooda iyo dadka Finland dib ugu soo guurey waxaa heli kara lacagta caawimada ee waxbarashada, xitaa iyagoo aan weli laba sannadood Finland joogin. Sidoo kale kuwa 18 sano aan gaarin isla markay Finland soo degaan ayey heli karaan lacagta caawimada ee waxbarashada, haddii waalidkood si joogto ah Finland u deggen yihiin.

*Wixii faahfaahin ah ee ku saabsan lacagta caawimada ee waxbarashada waxaa laga heleyaa xafiisyada **Hay'adda caymiska caafimaadka qaranka (KELA)**.*

Nolosha shaqada

Waa in la xasuustaa sharciga shaqada (työlupa)
Dadka waddanka u soo guurey marka laga reebo dhowr ay xaaladoodu sida caadiga ah ka duwan tahay mooyee intooda kale waxay u baahan yihiin sharci ay Finland kaga shaqaystaan, sharcigaasna waxaa bixiya Hay'adda ajnebiga ee sharciyada (Ulkomaalaisvirasto).

Waddankan Finland dumarka iyo raggu waxay leeyihiin xuquuq, waajibaad iyo fursado isku mid ah oo ku saabsan xagga shaqada. Waa wax iska caadi ah inay dumarka qabtaan shaqooyin mashahar lagu qaato ama ay ganacsadayaal yihiin oo aanay guriga uun joogin. Ka qaybqaadashada nolosha shaqadu waxay xoojisaa inay dumarku helaan madaxbannaani xagga dhaqaalaha ah.

Sinnaanta xagga shaqada
Sharciga sinnaanta waxaa si gaar ah loo tixgeliyaa, sidii wanaajin lahaa xaaladda dumarka shaqada. Sharcigu wuxuu kaloo shaqabixiyaha waajib kaga dhigayaa inuu fududeeyo, sidii laysugu dheellitiri lahaa lahaa shaqada iyo nolosha qoyska. Ujeeddaduna waa inay ragga dumarkuba helaan fursado isku mid ah oo ay kaga qaybqaataan daryeelka guriga iyo inay shaqaystaan.

Finland sharciga ayaa mabnuucaya cunsuriyadda ay salka u tahay inuu qofku lab ama dhedig yahay iyo in qofka lagu cunsuriyadeeyo asalkiisa, diintiisa ama da'diisa. Waxaa la rabaa in dadka oo dhan si isu dhiganta loola dhaqmo markay shaqo raadsanayaan iyo shaqadaba. Ujeeddaduna waa in dadka waddanka u soo guurey ka qaybqaataan nolosha shaqada iyo hawlaha arrimaha bulshada iyagoo ah xubno la siman dadka kale.

Raadinta shaqada
Bilaabidda shaqo raadinta waxaa qofka ka caawinaya **xafiisyada shaqada**, kuwaas oo ay inta badan joogaan shaqaale ku takhasusay sida loogu adeego dadka waddanka u soo guurey. Waxaa wanaagsan markuu qofku Finland u soo guuro, inuu isla markiiba tago xafiiska shaqada ee degmediisa oo is qoro inuu shaqo raadis yahay. Xafiisyada shaqada waxaa laga helaa warar ku saabsan shaqooyinka bannaan iyo fursadaha shaqo barashada iyo waxbarashadaba. Raadinta shaqada waxa ugu muhiimsan waa inuu qofku ahaado mid firfircoon oo uu la xiriiro shaqabixiyayaalka.

Mushaharka
Dakhliga uu qofku isagu shaqaysto waa hanti uu isagu shakhsi ahaan u leeyahay. Sida caadiga ah shaqabixiyuhu wuxuu qofka mushaharkiisa ugu soo shubaa lambarka bangiga ee uu leeyahay ee uu soo sheego. Qofku wuxuu akown ka furan karaa bangiga uu isagu doorto, laakiin si qofka akown loogu furo waxaa loo bahan yahay baasaboor ama kaar aqoonsi oo aan dhicin.

Canshuurta
Qof kasta oo shaqeeya oo Finland deggan dakhliga uu shaqaysto wuxuu ka bixiyaa canshuur ay dowladu qaadato iyo mid degma-

Faa'iidada shaqadu waxay kaloo ka muuqanaysaa lacagta hawlgabka
Dakhliga mushaharka ee uu qofku shaqaysto wuxuu sidoo kale saaamayn ku yeelanayaa madaxbannaanida qofka ee mustaqbalka. Haddii qof shaqaale ahaa uu shaqo la'aan noqdo, lacagtiisa shaqo la'aantu waxay ku xiran tahay mushaharkiisii, inta badanna way ka badan tahay tan qofka wakhtiga dheer shaqo la'aanta ahaa. Isla sidaas oo kale qofka mushaharka qaadan jirey waxaa suurgal ah in lacagtiisa hawlgabku badato, marka wakhtiga uu mushaharka qaadanayey badatoba. Dhaqaalaha badbaadada bulshada ee dadka markoodii hore shaqayn jirey inta badan way ka madaxbannaan yihiin oo kuma xima dakhliga xaaska ama ninka soo gala.

Dumarka iyo ragguba Finland way ka shaqaysan karaan shaqo aan guriga ahayn. Wakhtigan hadda lagu jiro tirada dumarka ee shaqaysaa aad bay ugu dhow dahay tirada ragga shaqeeya.

diisu qaadato. Dadka dakhliga badan soo galo canshuurta ay bixiyaan way ka badan tahay tan ay bixiyaan dadka dakhliga yar soo galo. Shaqabixiyaha ayaa canshuurta ka gooya isagoo isticimaalaya kaarka canshuurta ee qofka shaqaalaha ah. Qofka shaqaalaha ahi waa inuu kaarkiisa canshuurta u geeyaa shaqabixiyaha, markuu heshiiska shaqadu bilaamo.

*Qofka waddanka u soo guurey inta aanu shaqadiisa ugu horaysa bilaabin waa inuu **xafiiska canshuuraha** ee degmadiisa ka soo qaataa kaarka canshuurta. Waxaana muhiim ah in uu qofku yiraahdo waxaan ahay qof waddanka u soo guurey. Sannadka ugu horeeya wixii ka dambeeya qofku uma baahna inuu kaarka canshuurta gooni ahaan u doonto, sababtoo ah guriga ayaa loogu soo dirayaa.*

Dhaqaalaha badbaadada bulshada (sosiaaliturva)

Dhaqaalaha canshuurta ah ee la soo ururiyey waxaa lagu maalgeliyaa badbaadada bulshada. Caadi ahaan dumarka iyo ragguba iyagaa Finland shaqaysta oo naftooda iyo qoyskooda masruufa. Hase ahaatee mar walba sidaasi ma suuroowdo, tusaale ahaan shaqo la'aan awgeed, gabow, dhaawac ama jirro awgeed. Markay jiraan xaaladaha noocaas ah bulshadu waxay isku daydaa in la sugo nolosha dhaqaale ee dadka. Dhaqaalaha badbaadada bulshada intooda badan waxaa u xilsaaran **Hay'ada caymiska caafimaadka qaranka** ee **KELA**, waxaana xaq u leh qof walba oo Finland si joogto ah u deggan, iyada oon aan dhalashadiisa loo eegeynin.

Waxqabadka wakhtiga firaaqada ah (vapaa-ajan toiminta)

Mar walba hore kama helo qofku shaqo, xitaa isagoo si firfircooni leh u raadsanaya. Markaas oo kale ma aha inuu qofku niyadjabo oo gurigiisa isku go'doomiyo. Finland waxaa ka jira fursado badan oo uu qofku hiwaay ahaan u samayn karo ugana qaybqaadan karo tusaale ahaan hawlaha iskaa wax u qabso ama hawlaha ururada. Waxaa jira degmooyin badan oo ay ka jiraan waxqabadyo loogu talagalay dumarka oo keliya. Jaaliyadaha ay dadka waddanka u soo guurey leeyihiin iyo goobaha ay dadka dhaqamada kala duduwani ku kulmaan ayuu qofku dhaqankiisa ku dhawran karaa, uuna kula kulmi karaa dad cusub. Hawlaha iskaa waxu qabso iyo ururadu waxay u suuragelinayaan qofka in aanay ka lumin aqoontiisu iyo xirfaddiisu, isla markaana uu sii korodhsado, waxaana dhici karta inay macno weyn u samayso qofka xagga shaqo helidda.

*Wixii faahfaahin dheeraad ah waxaa laga helayaa **xafiisyada dhaqanka iyo waxqabadka wakhtiga firaaqada** ah ee degmada uu qofku deggen yahay (kulttuuri- ja vapaa-aikatoimistot), **ururada** (järjestöt) iyo **jaaliyadaha** (yhdityksetiyo weliba **ogeysiisyada ku qoran joornaalka degmada**.*

Tusaale ahaan warqadaha furiinka iyo qaybsashada hantidu waxay noqon karaan kuwo ay adag tahay in la fahmo. Diyaarinta qoraalada dukumeentiga ah waxaa inta badan loogu baahdaa qof aqoon u leh. Finland caawimada ku saabsan waxyaabaha maxakamadda iyo sharciga ah waxaa bixiya caawiyayaasha guud ee sharciga (yleiset oikeusavustajat), qareemada (asianajajat) iyo sharciyaqaanada kale (muut lakimiehet). Dadka dhaqaalahoodu liito waxaa suuragal u ah inay xafiiska caawimada arrimaha maxakamadaha ka helaan caawimo sharciga ah oo lacag la'aan ah.

WAA IN LAGA FIIRSADAA MARKA LA SAXEEXAYO HESHIISYADA

Inta aan la sexeexin heshiisyada qoraalka aha iyo dukumeentiyada kaleba waa in uu qofku fahmaa waxa ku qoran. Heshiisyada qoraalka ah sharci ahaan ayaa loo aqoonsanayaa (sitova). Haddii luuqadda qofku aanay ku filayn inuu fahmo heshiisyada, waxay tahay inuu codsado turjubaan. Shuruudaha heshiiska shaqadana waxaa wanaagsan inuu qofku fahmo waxay yihiin inta aanu saxeexin ka hor.

Tuusaale ahaan warqadaha furiinka iyo qaydsashada hantidu waxay noqon karaan kuwo ay adag tahay in la fahmo. Diyaarinta qooraalada dukumeentiga ah waxaa inta badan loogu baahdaa qof aqoon u leh. Finland caawimada ku saabsan waxyaabaha maxakamadda iyo sharciga ah waxaa bixiya caawiyayaasha guud ee sharciga (yleiset oikeusavustajat), qareemada (asiantuntijat) iyo sharciyaqaamada kale (muut lakimiehet). Dadka dhaqaalahoodu liito waxaa suuragal u ah inay xafiiska caawimada arrimaha maxakamadaha ka helaan caawimo sharciga ah oo lacag la`aan ah.

Dhibaatooyinka nolosha qoyska

Nolosha qoys walba farxadda mooyee, waxaa kaloo la xiriira iska horimaadyo iyo dhibaatooyin. Mararka qaar qofka awoodiisa iyo xalalka uu ku fekeraa kuma filla in dhibaatooyinka la xalliyo. Markaas oo kale waxaa wanaagsan inta aanay dhibaatadu sii weynaan, in xallalka raadintooda lala kaashado dad aanay arrintu khusayn oo takhasuskoodu yahay arrimahaas.

CAAWIMO ISKA HORIMAADYADA DARTOOD

Degmooyinka Finland oo dhan waxay leeyihiin rugo ah barbaarinta iyo la talinta qoyska, kuwaas oo dadka ka caawiya su'aalaha ku saabsan xiriirka dadka, nolosha qoyska iyo barbaarinta carruurta. Mid ka mid ah waxyaabaha ay qabtaan rugaha la talinta qoysku waa inay isku dayaan inay qoyska heshiisiiyaan. Xafiiska sooshalka ee degmada ayaa la weydiin karaa, sida heshiisiinta loo heli lahaa. Marka qoyska la dhexdhexaadinayo xubnaha qoysku ayaa waxay isku dayaan iyagoo kaashanaya shaqaalaha sooshalka ama qof cilminafsiga yaqaan (psykologi) inay dhibaatada jirta u helaa xal caddaalad ah oo qanciya dhammaan xubnaha qoyska. Dhexdhexaadinta waxaa ka qaybqaadan kara dhammaan xubnaha qoyska ama qayb iyaga ka mid ah. Dhexdhexaadinta waxaa la dalban karaa in qoyska laga caawiyo dhammaan dhibaatooyinka iska horimaadka qoyska iyo kuwa furiinka la xiriira.

Dhexdhexaadinta arrimaha qoyska ee degmadu qabanqaabiso waa lacag la'aan, waxyaabaha qofka dadka dhexdhexaadinaya lagu wadahadlaana waa sir oo cid aan shaqo ku lahayn looma sheegayo. Degmada mooyee adeegga dhexdhexaadinta waxaa laga helaa tusaale ahaan kaniisadaha iyo ururada kale iyo shakhsiyaadka ku takhasusay arrimaha talasiinta qoysaska.

Dhibaatooyinka caafimaadka maskaxda

U soo guuridda waddan cusub iyo la qabsashadiisu waxay qofka ku noqon karaan nafsad ahaan waayoaragnimo aad u adag. Waxaa kaloo qofka maskax ahaan culays ku hayn kara dhibaatooyinkii uu waddankiisa kula soo kulmay iyo welwelka xaaladda ehelkiisii uu ka soo tegey. **Xafiisyada caafimaadka maskaxda** (mielenterveystoimistot) ee degmooyinku waxay dadka siiyaan talooyin iyo daryeel ku saabsan dhibaatooyinka caafimaadka maskaxda. Dadka degmada deggan adeegani waa u lacag la'aan.

Waxaa kaloo Helsinki ku yaalla **Xarunta caawinta ajnebiga dhibaataysan** (Ulkomaalaisten kriisikeskus) oo u adeegta dhammaan dadka ajnebiga ah ee Finland deggan iyo qoysaskooda. Xaruntaas waxaa laga helaa caawimo lacag la'aan ah oo ah dhibaatooyinka caafimaadka maskaxda iyo kuwa bulshadaba. Dadka qaxootiga ah ee waddankooda markay joogeen jirdilka lagu sameeyey iyo ehelkoodaba waxaa lacag la'aan iyadoo ah lagu daryeelaa Helsinki Xarunta baxnaaninta ee dadka jirdilka lagu sameeyey (Kidutettujen kuntoutuskeskus). Marka meelahan la tegayo waa in hore ballan looga sii qabsadaa.

Guryaha ugu horeeya

Markuu qoyska u dhasho ilmaha ugu horeeyaa waxay keenaysaa xaalad nololeed cusub iyo in wax cusub la barto. Mararka qaar ilmuhu wuxuu dhashaa iyadoo ay qoyska haystaan dhibaatooyin khaas ah, sida guri la'aan ama dhibaato xaaladda qoyska ah. **Guryaha ugu horeeya** (Ensikodit) waxaa loogu talagalay hooyooyinka iyo carruurta, ujeeddaduna waa inay taageeraan hooyanimada markay jiraan xaaladaha adag ee kor lagu soo sheegay oo kale. Guryahaas waxaa degin kara dumarka uurka leh iyo hooyooyinka ummulay iyagoo carruurtooda wata. Guryaha ugu horeeya waxaa hooyooyinka la baraa waxyaabaha ku saabsan hooyonimada iyo sida carruurta loo daryeelo, bilowga horana waxaa hooyooyinka laga caawiyaa sidii ay u noqon lahaayeen waalid isku filan. Wakhtiga guryahaas la deggenaan karaa uu kala duduwan yahay, caadi ahaan hooyada iyo ilmuhu waxay guryahaas deggenaadaan lix bilood.

***Nasiibdaro** aad ayey u badan tahay in guriga dhexdiisa dilliin ka dhaco. Inkastoo dumarku inta badan ka baqaan in qof aanay aqooni dilliin ku sameeyo, haddana dilliinka dumarka lagu sameeyaa guriga ayuu ka dhexdhacaa. Shantii naagood ee Finnish ahba mid ayaa waxay sheegtay inay dilliin ama hanjabaad dilliin ah ay kala kulantay ninka ay hadda wada nool yihiin.*

*Waxyaabaha ku saabsan guryaha bilowga ah waxaa laga helaa **xafiiska sooshalka iyo rugta la talinta.***

Dhibaatooyinka carruurta iyo dhallinyarada

Inta badan carruurta iyo dhallinyaradu marka loo eego dadka waaweyn si dhakhso ah ayey ula qabsadaan dhaqanka cusub. Saaxiibadood iyo iskuuladooda ayey ka bartaan caadooyin cusub, kuwaas oo ay dhici karto inay waalidka ku adkaadaan inay fahmaan. Dhibaatooyinka suuragalka ah ee ku saabsan sidii ay isugu dheellitiri lahaayeen dhaqankoodii hore iyo dhaqankan cusub waxaa carruurta iyo dhallinyarada u wehelin kara inay bannaanka kula kulmaan dhibaatooyin kal duwan, sida in iskuulka lagu dhibo oo kale (koulukiusaaminen). markay dhibaatooyinka kordhaana waxay carruurtu khatar u yihiin inay daroogo ama dembiyo kale faraha la galaan.

Si dhibaatooyinkaas looga hortago waxaa muhiim ah inay waalidku carruurta kala had-

Mabnuucidda u soo dhawaashada badbaadadeeda ayaa la heli kara

Finland waxaa ka jira sharci ah mabnuucidda u soo dhawaashada (lähestymiskielto). Mabnuucidda u soo dhawaanshada macneheedu waa, in qofka naftiisa, caafimaadkiisa, xornimadiisa ama rabaddiisa ilaa xad la sugayo iyadoo qofka kale laga mabnuucayo inuu la soo xiriiro. Mabnuucidda u soo dhawaanshada waxaa la dalban karaa, tusaale ahaan, haddii ninkii/xaaskii hore ama qofka ay qofka wada noolaayeen qofka kale ula dhaqmo si dagaal iyo hanjabaad leh. Markay shaqaaluhu xukumayaan mabnuucidda u soo dhawaanshada, waxay qiyaasayaan qofka mabnuucidda dalbanaya hadalkiisa iyo caddaymaha suuragalka ah ee jira, sida warqadaha dhakhtarka, la xiiriidda booliska iyo hadalada markhaatiyada. Dilka ama dagaalka dhacay waxaa loo arki karaa sabab weyn oo keenaysa mabnuucidda u soo dhawaanshaha. Laakiin dilka ama dagaalku ma aha sababta keliya ee mabnuucidda loo dalban karo.

Mabnuucidda u soo dhawaanshaha lama xukumi karo, haddii labada qof isku guri ku nool yihiin. Caawimo ku saabsan sida mabnuucidda u soo dhawaanshaha loo dalbado waxaa laga helaa tusaale ahaan shaqaalaha sooshalka. Mabnuucidda u soo dhawaanshaha waxaa la dalbadaa iyadoo hadal ahaan ah ama qoraal ahaan ah, waxaana laga dalbadaa booliska ama maxakamada degmada (käräjäoikeus).

laan arrimahaas, ayna si joogto ah ula xiriiraan carruurta xannaanadooda iyoiskuulkooda. Dhibaatooyinka yaryar xitaa waxaa fiican in markiiba wax laga qabto. Waalidku waa inay xasuustaan, in Finland dhallinyaradu xaq u leeyihiin, inay iyagu go'aan ka gaaraan waxyaabaha noloshooda ku saabsan, tusaale ahaan inay iyagu doortaan qofkay guursanayaan.

Arrimaha ku saabsan dhibaatooyinka carruurta iyo dhallinyarada waxaa caawimo laga raadsan karaa ***xarumaha barbaarinta iyo la talinta qoyska*** *(kasvatus- ja perheneuvolat) iyo* ***xafiisyada caafimaadka maskaxda*** *(mielenterveystoimistot)* ee *degmooyinka.*

DAGAALKA QOYSKA DHEXDIISA

In xaaska/ninka ama carruurta la dilo waa dagaal qoyska dhexdiisa ah. Siduu sharciga Finland dhigayo dilka qoyska dhexdiisu waa dembi, inuu qofka si dagaale leh u dhaqmana sabab loogama dhigi karo, tusaale ahaan inay tahay arrin la xiriiraan dhaqanka. Qofka la dilaa waa inuu dacwo geeyaa booliska, dhakhtarna u tagaa si baaritaan loogu sameeyo.

Dagaalka xaaska/ninka lagu sameeyaa wuxuu noqon karaa mid jir ahaan ah, nafsad ahaan ah, dhaqaale ahaan ah ama wasmo ahaneed.

Inta badan noocyada kala duwan ee dagaalku way wada socdaan.

- Dagaalka jir ahaaneed waa tusaale ahaan wax ku dhufasho, riixid, haraati iyo cunaha oo qofka la qabto.
- Dagaalka nafsad ahaaneed waa balak meyl (kiristäminen), hanjabaad, liidid, cadaadis nafsadeed, baqdin gelin iyo xadidida socodka qofka iyo xiriirka saaxiibada iyo qaraabada oo la xadido.
- Dagaalka dhaqaale ahaan waa, haddii xaaska/ninka loo diido inay/inuu shaqaysto ama lacag la'aan lagu hayo oo aan lacag la siin.
- Dagaalka wasmo ahaaneedna waa in xaaska/ninka loo taataabto si wasmo ku jirto iyadoo/isagoo aan raalli ka ahayn, ku khasbidda wasmada iyo kufsashada.

Sidoo kale, in carruurta dilliin jirka ahaan loo ciqaabo Finland waa mabnuuc. Dagaalka qoyska dhexdiisu iskiis isagama dhammaado ee wuuba ka sii daraa. Caawimose waa loo helaa dagaalka qoyska dhexdiisa. Degmooyinka waaweyn waxaa ku yaalla meelo la yiraahdo Guryaha badbaadada oo caawiya dadka dilliinka ama dagaalka lagu sameeyey. Degmooyinka kale xitaa waa laga soo aadi karaa **Guryaha badbaadada** (turvakodit). Waxaa kaloo caawimo laga helaa degmada **xafiiskeeda sooshalka**, **rugteeda caafimaadka**, **xafiis-**

Väkivalta on tärkeää saada loppumaan

Suomessa myös kotona tapahtuva väkivalta on virallisen syytteen alainen rikos. Tämä tarkoittaa sitä, että syytteen nostaminen kotona tehdystä väkivallasta ei riipu uhrin päätöksestä. Syyttäjä nostaa syytteen ellei uhri sitä omasta vakaasta tahdostaan vastusta eikä teko ole törkeä.

*Waxyaabaha ku saabsan guryaha badbaadada (turvakodit ja turva-asunnot) waxaa laga helaa **xafiiska soos-halka**. Haddii degdeg jiro, fiidkii iyo Sabtida iyo Axadda waxaa **booliska** ayaa talada bixiya.*

keeda caafimaadka maskaxda iyo **rugteeda la talinta qoyska** (perheneuvola). Dilliinka qoyska dhexdiisa waxaa kaloo loo sheegi karaa shaqaalaha **rugta la talinta hooyada iyo ilmaha** (äitiys- ja lastenneuvola). Shaqaaluhu inay caawiyaan ayaa waajib ku ah.

Sidoo kale qofka wax dilaa wuxuu u baahan yahay in la caawiyo. Degmada uu deggen yahay **shaqaalahooda maamulka** iyo **dadka ku takhasusay caawinta dadka dagaalama** ayaa caawinaya kuwa raba inay dagaalka iyo dilliinka iska dhaafaan. Marka dhibaatadu jirto waxaa wanaagsan, in qofka la dilo ee dhibanaha ah iyo kan wax dilaa mid waliba uu goonidiisa u raadsado cid caawisa. Sababtoo ah qofka dhibanaha ah waxaa dhici karta inay ku adkaato inuu dhibaatooyinkiisa ka hadlo, haddii qofkii dhibaatada ku hayey uu goob joog yahay.

Guryaha badbaadada

Guriga badbaadada (turvakoti) waxaa tegi

Furiinka waxaa laga dalbadaa maxakamadda degmada



kara qof walba oo gurigiisa kula kulmay dilliinka qoyska. Markay dhibaatadu jirto ama uu qofku si degdeg ah ugu baahan yahay badbaado si toos ah ayuu qofku u tegi karaa guriga badbaadada ama telefoon ayuu kula xiriiri karaa, wakhti ka dib ayuu sooshalkiisa weydiisan karaa inuu ula xiriiro. Hooyada iyo carruurtu si ku meel gaar ah ayey u deggenaan karaan guriga badbaadada, haddii ay dagaal, hanjabaad ama baqdin darteed ay u suuroobi weydo ama ay khatar tahay inay gurigooda joogaan. Shaqaalaha guriga badbaadada ayaa si wadajir ah looga fekeri karaa sidii xal loogu heli lahaa loona joojin lahaa dhibaatada dagaalka ee iska socota. Qofka dhibani isaga ayaa xalka gaaraya. Guryaha badbaadada iyo telefoonadooda dhibaatada degdegga ah loogu talagalay afar iyo labaatanka saacba way furan yihiin. Degmooyinka waxay kaloo leeyihiin guryo loogu talagalay dadka ay dhibaatada degdegga ahi hayso iyo kuwo badbaado (kriisi- ja turva-asunnot).

Waa muhiim in dagaalanka la joojiyo

Xitaa dilliinka ama dagaalka guriga dhexdiisa ka dhacaa Finland waa dembi hoos taga xeerilaaliyaha guud. Arrintan macnaheedu waa, in la dacweeyo qofka dagaalka guriga dhexdiisa ku geystey kuma xirna qofka dhibanaha ah. Xeerilaaliyaha ayaa dacweynaya qofka, haddii aan qofka dhibanaha ahi arrintaas horistaagin, dhibaatada la geystayna aanay ahayn mid muhiim ah.

Kufsashada

Sida uu sharciga Finland qabo kufsashadu waa dembi. Sidoo kale haddii ninku xaaskiisa xoogo waa dembi. Qofka la kufsaday waa inuu markuu dembigu dhaco, si degdeg ah ula xiriiraa **booliska**, **dhakhtarna** u tagaa. Kufsashadu ma aha wax uu sabab u yahay qofka la kufsaday, mana aha inuu dareemo inuu ceeboobey. Qofka la kufsaday wuxuu in laga caawiyo dhibaatooyinka kufsashada ka soo gaarey weydiisan karaa **shaqaalaha maamulka** ee degmadiisa. Helsinki waxaa ku yaalla **Xarunta dhibaataooyinka dumarka la kufsaday ee Tukinainen** (raiskauskriisikeskus Tukinainen) oo waddanka oo dhan u adeegta.

FURIINKA

Guurku waa heshiis aan khasab ahayn oo la burin karo. Haddii, in la wada noolaado ay noqoto mid aan suurogal ahayn, waxaa wanaagsan, in laga fekero in lays furo. Furiinku aad buu Finland ugu badan yahay. Furiinka waxaa la dalbadaa iyadoo codsi lageynayo **maxakamadda degmada** (käräjäoikeus) ee uu qofku deggen yahay. Maxakamadda degmadu ma baarto sababta furiinka iyo xiriirka shakhsi ahaaneed ee ka dhexeeya labada qof ee isqaba.

Furiinka qofka waa loo ogolaan karaa, xitaa haddii kan kale aanu raalli ka ahayn.

Qaybsashada hantida furiinka ka dib

Markay wada noolaanshadadu dhammaato, waxaa la go'aamiyaa sidii hantida loo qaybsan lahaa, arrimaha carruurta ku saabsan iyo labada qof ee isqabey kan ku hadhaya guriga uu qoysku deggenaa. Sida hantida loo

qaybsanayaa waxay ku xiran tahay waddanka sharcigiisa la tixgelinayo marka labada qof ee isqabey hantida loo qaybinayo (fiiri bogga 5aad). Haddii sharciga Finland la tixgelinayo, furiinka ka dib hantida si is le'eg ayaa caadi ahaan labada qof loogu qaybinayaa. Arrintanna waxaa loo yaqaanaa **xuquuqda guurka** (avio-oikeus). Labada qof ee isqabay iyagaa waxay hantidooda ku qaybsan karaan, siday iyagu ku heshiiyaan. Haddii, sida hantida loo qaybsanayo lagu heshiin waayo maxakamadda ayaa qareen u xilsaaraysa inuu siday wax u jiraan soo caddeeyo.

Hase ahaatee hantida si isle'eg looma qaybiyo, haddii labada qof ay intii aanay is guursan ka hor ama intay isqabeen dhexdeeda ay samaysteen **heshhiiska shuruudaha guurka** (avioehtosopimus). Heshiiska shuruudaha guurka waxaa lagu heshiin karaa, in labada qof ee is qabaa midkoodna midka kale hantidiisa ku yeelan xuquuqda guurka ama qayb hantida ka mid ah aanu xuquuq guur ku yeelanayn. Marka ay sidaasi jirto labada qof mid waliba qaybta hantida ah ee heshiiska shuruudaha guurka lagu xusay ayuu lahaanayaa. Heshiiska shuruudaha guurku wuxuu sidoo kale saamaynayaa hantida, haddii labada qof midkood dhinto.

*Heshiiska shuruudaha guurku waa inuu ahaadaa mid qoraal ah. Marka la samaynayana waxaa wanaagsan in **xafiiska guud ee caawinta arrimaha sharciyada** (yleinen oikeusaputoimisto) ama **qof sharci yaqaan ah** la weydiisto caawmo ah sida loo diyaarinayo. Heshiiska shuruudaha guurka waa in laga diiwaan geliyaa **maxakamadda degmada** ee uu qofku deggen yahay.*

Sida furiinku u saamaynayo sharciga deggenaanshaha waddanka

Marka furiinku dhaqan galo, cusboonaysiinta ama kansalidda sharciga deggenaanshaha waddanka ee qof walba si goonidiisa ah ayaa looga fekeraa. Kala tegidda labada qof ee is qabey ama wada noolaa waxay sharciga deggenaanshaha waddanka saamaynaysaa oo keliya, haddii sharcigu ahaa mid wakhti go'an ku eg, sababta qofka waddanka u soo guurey loo siiyeyna ay ahayd xiriir qoys dartiis. Furiinku ma saameeyo sharciga deggenaanshaha waddanka ee aan wakhti uu dhacayo lahayn (pysyvä). Haddiise sharciga deggenaanshaha ee joogtada ah sababta qofka loo siiyey ay sal u ahaayeen warar khalad ah oo ku saabsan guurka ama wada noolaanshaha, furiinka ama kala tegiddu way saamayn kartaa sharciga.

Siinta sharciga deggenaanshuhu ka fekerid ayuu mar walba ku salaysan yahay. Shaqaalaha maamulku markay go,aanka sharciga deggenaanshaha gaarayaan waxay tixgeliyaan dhammaan sababaha arrinta la xiriira. Go'aanka waxaa sidoo kale saameeya, meesha loo arko in qofka waddanka u soo

Marka lays furo waxaa laga heshiiyaa arrimaha ku saabsan carruurta

Mida 1aad ee suuragalka ah

MASUULIYAD KA DHAXAYSA

Masuuliyadda ka dhaxaysa, waalidku si wadajir ah ayey furiinka ka dib xitaa ilmaha u barbaariyaan oo uga heshiiyaan arrimaha ilmaha ku saabsan. Xaqiiqdu waxay tahay waxaa jira arrimo badan oo uu go'aan ka gaaro waalidka uu ilmuhu la nool yahay. Ogolaanshaha waalidka kalese waxaa loo baahanayaa, tusaale ahaan markay jiraan sida go'aamada ku saabsan

- *in meeshuu ilmuhu deggenaa laga raro (gaar ahaan ka guuridda waddanka)*
- *u ogolaanshaha baasaboorka Finland*
- *waxyaabaha daaweynta caafimaadka ku saabsan*
- *ka beddelidda magaca ama diinta*
- *waxbarashada*
- *isticimaalka hantida ilmaha*

Mida 2aad ee suuragalka ah

QOF KELIGIIS MASUUL AH

Qofka ilmaha masuulka ka ah oo ah labada waalid midkood ayaa keligiis ilmaha daryeelaya, isaga keligiis ayaana go'aan ka gaaraya waxyaabaha ilmaha saameeya

guurey arrimihiisu u badan yihiin, ma Finland bay u badan yihiin mise waddankii uu hore u deggenaan jirey. Qofka Finnishka ah ee ay qofka ajnebiga kala tageen shaqaalaha maamulka kuma dhihi karo, waa in sharciga deggenaanshaha la kansalaa.

Haddii sharciga deggenaanshaha waddanka ee qofka la furay uu wakhti go'an ku eg yahay, inta badan si sharcigiisa loogu cusboonaysiyo waxaa laga rabaa inuu Finland deggenaa laba sano. Haddii qofku uu uur leeyahay ama carruuri Finland u joogto ama uu shaqeeyo ama uu waxbarasho ku jiro, cusboonaysiinta sharciga deggenaanshaha waa laga fekeri karaa, xitaa haddii uu Finland deggenaa in laba sannadood ka yar.

Khasab ma aha inuu qofku laba sannadood deggenaa Finland, haddii inay labada qof kala tagaan ay sabab u tahay dagaal uu midkood midka kale dilo. Waase in cadday ku filan oo ku saabsan dagaallamidda qofka loo keenaa shaqaalaha sharciga bixiya. Caddayntu waxay noqon kartaa tusaale ahaan warqad dhakhtar oo caddaynaysa dhaawacyo jir oo qofka la gaarsiiyey ama warbixin ay soo qortay rugta la talinta qoyska. Waxaa kaloo wanaagsan inuu qofku isaguna codsiga sharciga ku lifaaqo qoraal uu ku muujinayo siday wax u jiraan.

Xaaladda carruurta furiinka ka dib

Hawsha qofka carruurta masuulka ka ahi waa, inuu xil iska saaro carruurta wanaagooda, barbaarintooda iyo koriinkooda oo dheellitiran. Masuulnimada macnaheedu waa xuquuqda daryeelidda ilmaha iyo go'aan ka gaaridda waxyaabaha ilmaha khuseeya. Haddii loo baahdana qofka masuulka ah ayaa ilmaha wakiil ka noqda maxakamadda iyo xafiisyada shaqaalaha maamulka. Qofka masuulka ah oo keliya ayaa baasaboorkiisa ilmaha ku qoran kara.

Ilmaha guurka ku dhasha labada waalidba masuul ayey ka yihiin. Ilmaha xitaa waa irrin ku adag, haddii waalidku is furaan. Furiinka ka dib xitaa ilmuhu daryeel ayuu xaq ug leeyahay labada waalidba. Furiinka ka dib xitaa waxaa laysku dayaa inay **labada waalidba ilmaha masuul ka noqdaan** (yhteishuoltajuus).

Haddii ay suuragal tahay, furiinka ka dib waalidku iyagaa dhexdooda ka heshiiya arrimaha ku saabsan daryeelka ilmaha iyo meesha uu lu noolaanayo. Heshiiskaasna waxaa lagu ansixin karaa xafiiska sooshalka ee degmada, tusaale ahaan xafiiska arrimaha qoysaska (perheasiaintoimisto). Haddii waalidku aanay isku fikrad ka ahayn xalka soo baxa, go'aanka masuuliyada waxaa gaaraysa maxakamadda. Go'aanka maxakamaddu gaarayso waxaa saamaynaya danta ilmaha iyo warbixinta shaqaalaha sooshalka ee ku saabsan xaaladda waalidka.

Markay masuul ilmaha ka wada yihiin, labada waalidba waxaa laga rabaa inay awoodaan wadashaqayn, xitaa haddii iyaga dhexdooda ay ka jiraan is khilaafyo. Haddii aanay jirin shuruudihii loogu baahnaa masuuliyadda ka dhaxeysa waxay noqonaysaa in masuulaydda ka dhaxaysa la baab'iyo oo labada waalid midkood **keli ahaan ilmaha masuul looga dhigo** (yksinhuoltaja).

Xuquuqda la kulanka

Iyadoon aan la fiirinaynin furiinka ka dib, ma waxaa go'aan lagu gaarey inay labada waalid ba carruurta masuul ka noqdaan mise midkood baa keligiis masuul ka noqonaya, carruurtu waxay xaq u leeyihiin inay xiriir wanaagsan oo nabadgelyo leh la lahaadaan hooyada iyo aabbahaba. Waalidku waa inay si wadajir ah xil isaga saaraan, inuu ilmuhu si ku filan oo badan ula kulmo waalidka uu la nool yahay mooyee kan kale. Inuu ilmuhu waalidkan kale la kulmo waa xuquuq uu ilmuhu leeyahay, oo aan xaaskii/ninkii hore ee lays furay u diidi karin.

Caawimada masruufka

Labada waalidba waxaa waajib ku ah inay ilmaha masruufaan. Haddii waalidku aanay wada noolayn, ilmuhu **caawimo masruuf** ah(elatusapu) ayuu xaq ugu leeyahay waalidka aanu la noolayn. Caddadka lacagta masruufka waxaa lagu go'aamiyaa heshiis lagu galo xafiiska shaqaalaha ilaaliya danta ilmaha (lastenvalvoja) ama go'aan ay maxakamadu gaarto. Lacagta masruufku waxay ku xiran tahay xaaladda dhaqaalaha ee qofka lacagta ay waajibka ku tahay inuu bixiyo. Haddii, waalidka ay tahay inuu lacagta bixiyo uu awoodi waayo lacagtii lagu heshiiyey ee masruufka, ilmuhu wuxuu xaq u leeyahay inuu **lacag caawimo oo masruuf ah** (elatustuki) ka helo degmada uu deggen yahay.

*Faahfaahinta ku saabsan arrinta ilmaha furiinka ka dib waxaa laga helaa **xafiiska ilaalinta xuquuqda ilmaha** iyo **shaqaalaha sooshalka** ee degmada.*

Meelaha lagala xiriiro shaqaalaha maamulka ee muhiimka ah

XAFIISKA LOO WAKIISHAY SINNAANTA
(Tasa-arvovaltuutetun toimisto)
Xafiiska loo wakiishay sinnaantu wuxuu qofka la cunsuriyadeyey u caawin karaa, isagoo sugaya xuquuqda qofkaas. Xafiiska loo wakiishay sinnaanta waxaa laga dalban karaa warbixin caddaynaysa, in la sameeyey cunsuriyad ay sabab u tahay maadaama uu qofku dhedig ama lab yahay. Hawsha Xafiiska loo wakiishay sinnantu waa

- in uu la socdo, in sharciga sinnaanta ee la xiriira sinnaanta ragga iyo dumarka la dhawro iyo in la dhawro sharciga mabnuucaya cunsuriyadda iyo xayaysiisyada cunsuriyadda ah.
- inuu hore u marayo ujeeddada sharciga, isagoo kaashanaya bilaabidda talo siinta iyo hagidda
- inuu dadka u sheego macluumaadka ku saabsan sharciga iyo sida loo isticimaalayo
- inuu la socdo sida ay sinnaanta ragga iyo dumarku uga hirgasho xirfadaha kala duwan ee nolosha bulshada

Xafiiska loo wakiishay sinnaanta
Cinwaanka boostada: PL 33,
00023 VALTIONEUVOSTO
Cinwaanka tegidda: Mikonkatu 2 D, dabaqa 6aad
00100 HELSINKI
Tel. (09) 160 4582
Cinwaanka e-mail: tasa-arvo@stm.vn.fi
www.tasa-arvo.fi

XAFIISKA AJNEBIGA EE SHARCIYADA
(Ulkomaalaisvirasto)

- wuxuu go'aan ka gaaraa arrimaha ku saabsan imaatinka waddanka, joogidda waddanka iyo qaxootinimada
- wuxuu go'aan ka gaaraa arrimaha ku saabsan qaadashada dhalashada Finland
- wuxuu siiyaa adeeg warar ah shaqaalaha maamulka iyo ururada caalamiga ah
- wuxuu hayaa diiwaanka dadka ajnebiga ah

U adeegga macaamiisha ee xafiiska ajnebiga ee sharciyadu wuxuu u shaqeeyaa sidan:
Qabashada dukumeentiyada:
Isniinta – Jimcaha saacadda 8.00 – 16.15
Weydiimaha ku saabsan codsiyada oo warqad ahaan ama telefoon ahaan ah.
Telefoon ku weydiin:
Talaadada–Khamiista, lambarka telefoonka (09) 476 5500
Arrimaha u soo guuridda waddanka, saacadda 10–11
Arrimaha qaxootiga iyo nabadgelyada siyaasadeed, saacadda 14–15
Arrimaha dhalashada, saacadda 14–15
Weydiimaha ku saabsan imaatinka codsiga iyo meesha falanqaytiisu marayso Isniin – Jimce, saacadda 8.00–16.15, lambarka telefoonka 0300 44300, qiimuhu waa 0.08_/daqiiqadiiba + qiimaha caadiga ah (paikallisverkomaksu)

Xafiiska ajnebiga ee sharciyada
Cinwaanka boostada: PL 92, 00531 Helsinki
Cinwaanka e-mail: ulkomaalaisvirasto@uvi.fi
www.uvi.fi

XAFIISKA LOO WAKIISHAY ARRIMAHA DADKA JINSIYAD AHAAN WADDANKA KU YAR
(Vähemmistövaltuutetun toimisto)
Hadafka xafiiskan loo wakiishay arrimaha dadka waddanka jinsiyad ahaan ku yari waa inuu ka hortago cunsuriyadda jinsiyadda ku salaysan, inuu horumariyo xiriirada fiican ee jinsiyadaha kala duduwan iyo inuu sugo xuquuqda ay leeyihiin dadka jinsi ahaan waddanka ku yar iyo ajnebigu iyo inuu ilaaliyo inay fulaan nidaamyada ah cunsuriyad la'aanta. Hawlaha wakiilka arrimaha dadka jinsiyadahaan waddanka ku yari waa

- inuu ka war hayo, horumarna ku sameeyo xuquuqda iyo xaaladda dadka ajnebiga ah iyo dadka jinsiyad ahaan waddanka ku yar
- inuu warbixin ka bixiyo fulinta nidaamka ah isku xuquuq iyo inuu wax ka qabto sidii loo joojin lahaa cunsuriyadda iyo caddaalad darada uu dareemo
- inuu bixiyo wararka ku saabsan sharciyada ku salaysan cunsuriyadda ay sababta u tahay asalka jinsiyadu iyo weliba inuu bixiyo macluumaadka sharciyada ku saabsan xuquuqda iyo xaaladda dadka jinsi ahaan waddanka ku yar iyo ajnebiga iyo sida sharciga loo isticimaalo
- inuu fuliyo hawlaha sharciga ajnebiga (378/1991) loogu xilsaaray wakiilka dadka jinsi ahaan waddanka ku yar.

Xafiiska loo wakiishay arrimaha dadka jinsiyad ahaan waddanka ku yar
Cinwaanka boostada: PL 34
00023 VALTIONEUVOSTO
Tel. (09) 160 06
Cinwaanka e-mail:
vahemmistovaltuutetun.toimisto@mol.fi
www.mol.fi/vahemmistovaltuutettu

SINNAAN KU HELID FINLAND GUDEHEEDA –

Macluumaad loogu talagalay dumarka iyo ragga waddanka u soo guurey

Buuggan waxaa ku qoran faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan tusaale ahaan mawduucyadan:

- *Isguursashada*
- *Carruurta barbaarintooda iyo iskuul dhigashadooda*
- *Wax ka barashada Finland*
- *Shaqo raadsashada*
- *Dhibaatooyinka nolosha qoyska*

Painettua esitettä on saatavana eri kielillä:

- *suomi*
- *englanti*
- *venäjä*
- *kurdi*
- *vietnam*
- *somali*
- *takalogi*
- *thai*

Myös muita kieliversioita löytyy osoitteesta:
www.mol.fi/migration

Esitteen tilaus:
Edita Prima Oy
prima.asiakaspalvelu@edita.fi
puh. 020 450 011

TYÖMINISTERIÖ
www.mol.fi